

Farriin Ku Saabsan Doorshada Dadban Ee 2016

Haddii Alle idmo, dhowaan dalka waxaa ka qabsoomi doona doorshooyinka labada aqal ee baarlamaanka federaalka ee Soomaaliya; Aqalka Sare iyo Aqalka Hoose iyo doorshada Madaxweynaha.

Hannaanka doorasho ee sannadka 2016, waa hanaan doorasho baarlamaan oo federal ah oo ka kooban laba aqal. Baarlamaanka federaalku wuxu ku dhisanyahay hab isugu jira bulsho iyo degaan. Aqalka Hoose oo ah Golaha Shacabka oo ka koobnaandoona 275 xubnood, iyo Aqalka Sare oo ka koobnaandoona 54 xubnood.

Aqalka Hoose wuxuu matalaa dadweynaha. 275ka xildhibaan ee Golaha Wakiillada waxa lagu qaybsanayaa habka 4.5. Ergooyin cod-bixiyeyaa ah ayaa dooran doona 275 xildhibaan ee Aqalka Hoose.

Aqalka Sare wuxuu dhammaystirayaa xeer dejinta federaalka Soomaaliya oo hadda ka hor ku koobnayd oo keliya Aqalka Hoose. Muhimadda Aqalka Sare ma aha oo keliya kaqayb qaadashada doorshada Madaxweynaha, Balse ahmiyadda Aqalkani waa isu deelli tirka sharciyada dalka iyo iswaafajinta danaha heer qaran iyo kuwa heer dawlad goboleed. Aqalka Sare si gaara waxaa uu u matali doonaa dawladaha xubnha ka ah federaalka ee hadda jira iyo kuwa samaysmaya. Halka Aqalka Hoosena matalo dadweynaha.

Aqalka Sare, golayaasha fulinta Dawlad-goboleedyada ayaa u soo xulan doona ugu yaraan laba musharrax kurisgiiba, ka dibna baarlamaannada dowlad-goboleedyada ayaa dooran doona 54 xubnood ee Aqalka Sare ka koobnaan doono. Baarlamaan-Goboleedyadu kursi kasta gaarkiisa ayay ugu codeyndoonaan.

Najiidada laga filaayo doorashada 2016, waa in ay ka soo baxaan hay'ado si habsami ah uga wadashaqeeya dib-u-hanashada dawladnimo dhammaystiran. Himiladdaas iyada ahina waxaa ay u rahman tahay:

- ✓ Caddaalad falidda xildibaannada codka bixinaya ee kala dooranaya murashaxiinta u tartamaysa Aqalka Sare iyo Ergooyinka codbixiyaasha ah ee iyaguna kala dooranaya musharraxiinta u taagan Aqalka Hoose ee Baarlamaanka Federaalka. Waxaa kale oo rajada dawladnimo ay ku xiran tahay tayada xildhibaannada loo doorto labada aqal ee Baarlamaanka Federaalka. Waa marka la helo xildhiibaanno qofka ay u dooranayaan hoggaanka dalka u eega waxa uu u qaban karo dalka.
- ✓ Sidaa oo kale himilada ummaddu waxaa ay marti u tahay heerka hoggaaminta ee madaxweynaha ay doortaan xildhibaannada labada aqal ee baarlamaanku; madaxweynehuna uu xusho ra'isulwasaare karti iyo ammaano leh, Raisul-Wasaarehaasina dhiso xukuumad leh hufnaan iyo fulin.

Haddaba, xilbaannada dawladgoboleedyadow iyo ergada dooranaysa xildhibaannada Aqalka Hoosow, waxaa la idinka filayaa in aad soo saartaan xildhiibaanno leh aqoon iyo karti ay ku gutaan shaqada iyo mas'uuliyadaha labada aqal ee Baarlamaanka Federaalka.

